



Coming Oct. 1<sup>st</sup>

## Waxa la rabo inaad ka ogaatid sharciga cusub ee mamnuucaya qiiqa sigaarka.

- Laga bilaabo 1-da Oktoobar, dhamaan gudaha goobaha dadweynaha, oo ay ku jiraan dhamaan ganacsiyada, baararka iyo makhaayadaha waxay noqon doonaan goobo nadiif ka ah qiiqa sigaarka.
- Sharciga cusubi waxa uu hagaajin doonaa caafimaadka dhamaan dadka Minnesota isla markaana waxa uu yareyn doonaa kharashka daryeelka caafimaadka.
- Sannad kasta, lacag dhan \$215 malyuun doolar ayaa lagu kharashgareeyaa gudaha Minnesota si loo daweeyo dhibaatooyinka caafimaadka ee uu sababay qiiqa sigaarka cid kale cabtay.
- Sharciga cusub ee la yidhaahdo Xeerka Xoriyadda Neefsashada (*Freedom to Breathe Act*) waxa uu sugayaa in dhamaan shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha ganacsiga martigalinta, aanu soo gaadhin qiiqa sigaarka cid kale cabtay ee waxyeelada leh.
- Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sharciga, booqo, [freshairmn.org](http://freshairmn.org).

## Haddii aad ku fakiraysid inaad joojisid cabista sigaarka, waanu ku gargaari karnaa.

- Si aad u heshid gargaarka iyo taageerada aad u baahan tahay, booqo [quitplan.com](http://quitplan.com) ama wac 1-888-354-PLAN.

[freshairmn.org](http://freshairmn.org)